



ETAT DE FRIBOURG
STAAT FREIBURG

Ecole primaire du Schoenberg
Route de la Heitera 17, 1700 Fribourg

Service de l'enseignement obligatoire de langue
française SEnOF
Amt für französischsprachigen obligatorischen
Unterricht FOA

Ecole primaire du Schoenberg
Route de la Heitera 17
1700 Fribourg

T +41 26 352 91 51
www.epschoenberg.friweb.ch

Direction : Samuel Glannaz
E-Mail : dir.ep.schoenberg@edufr.ch

Ku socota waalidiinta ardayda
Fasalada 1H-8H

Fribourg, 21 Janaayo 2022

*Bandhigidda Klapp, hab isgaarsiin ka dhexeysa iskuulka iyo waalidiinta, laga bilaabo
Janaayo 21, 2022*

Waalidiinta qaaliga ah,

Isgaarsiinta u dhexeysa Iskuulka iyo waalidiinta waa muhiim.

Annaga waxaan rajeyneynaa in isgaarsiintu ahaato, mid hufan.

Habka **Klapp**, ayaa macalimiinta iyo maamulka dugsi ugu idinkugu soo dirayaan wararka, ballamada iyo waraaqaha si sahlan, taleefankiina casriga ah, tablet-kiina ama kombiyuutarkiina.

Dukumeentiyada u baahan in la saxiixo waxaynu sii wadi doonaa inuu cunugiina guriga keeno.

Klapp waxaa loo isticmaali doonaa

- In si degdeg ah la idin kula soo socodsiiyo wararka muhiimka ah.
- In la agaasimo ballamada.
- U sameysiga codsi macallinka ama maamulaha.
- U diridda dokumenti macallinka.

Klapp wuxuu beddelayaa Whatsapp, SMS yada iyo i-meylada (e-mails).

Waa muhiim ah in dhammaan waalidiinta ay soo degsadaan Klapp. Idinka go'aansan kara in hal waalid, labadaba ama dadka kale oo mas'uulka ah, ay helaan wararka lasoo marsiin doono **Klapp**.

1. Iska qor Klapp ilaa Febraayo 25, 2022. Ku soo degso hab-adeegsiga **Klapp** si lacag la'aan ah, taleefankaaga casriga ama toos u gal barta internetka ee www.klapp.mobi.
2. Akoon sameyso
3. **Klapp** ayaa kuu soo diri doona imeyl (e-mail) kaas oo ah inaad ku xaqiijiso akoonkaaga. Haddii aadan helin imeyl kaas (e-mail), ka dhex baar imeyladaada spamka (la xayiray) inuu ku jiro.
4. Waxaad gelisaa (furaha) sarbeeb ardayeedka ee ilmahaaga.
5. Adiga ayaa go'aansan kara, haddii aad rabto in dadka kale ay arkaan lambarkaaga telefoonka iyo in kale.

Haddii ay kugu adkaato inaad isqorto, waxaad kaalmo waydiisan kartaa telefankan
079 663 90 35.

Annaga aad ayaan ugu faraxsanahay ka qaybgelidda mashruucan **Klapp**, waxaane rajeyneynaa inaan kuu soo jeedino hab-iskaarsiineed fudud oo dhijitaal ah.

Naga gudooma Salaan Saaxiibtinimo,



Samuel Glannaz
Directeur de l'école primaire du Schoenberg



Marie-Laure Vonlanthen
Service de l'enfance, des écoles et de la cohésion
sociale de la Ville de Fribourg

Waxaad ka heli kartaa warar dheeraad, oo ku saabsan Klapp bar-cinwaaneedka:
www.klapp.pro.

Baraha xiriirinta (links) muhiimka ah:

Taageero - <https://support.klapp.mobi/de/>

Tallaabooyinka ugu horreeya - <https://support.klapp.mobi/de/eltern/registrierung>

Is-qoridda - <https://support.klapp.mobi/de/article/installation-und-registrierung>

Carruur badan - <https://support.klapp.mobi/de/article/mehrere-kinder>

Lifaaqyadda :

Caddeyn ilaalinta xogaha

Furo-sarbeebta oggolaanshaha

Getting Started international (Fal bilowida caalamiga)

Caddeynta ilaalinta xogaha



Klapp GmbH

Föhrenstrasse 1
5442 Fislisbach
032 510 08 38 | www.klapp.pro

Hawl-wadeenada Klapp waxay ku dhaqmaan si waafaqsan siyaasadda kalsoonimada Klapp, waxayna ula dhaqmaan xogaha si garowsho iyo kalsooniba ku dheehan.

Sida goob walba oo baraha internetka ah iyo hab-adeegsiga moobaylka, waxaan u baahanahay macluumaad shakhsiyadeed, si aan kuugu sameyno akoon aad isticmaasho.

Xogta waxa loo ururiyaa loona habeeyaa dhan ujeedooyin aqoonsi, loomana isticmaali doono waxyaabo kale. Annaga waxaan si adag u dhowrtaa mabaadi'da soo socota:



Annaga ma doonayno in aan lacag ka sameysano macluumaadkaaga. Annaga waxaan kuu dammaanad qaadaynaa in macluumaadka isticmaalaha aan marna laga iibin doonin cid saddexaad ama loo isticmaali doonin ujeedooyin xayaysiis.



Annaga waxaan u agaasimeyna macluumaadka isticmaalayaasha, si adag oo loo yaqaano (privacy by design). Annagu waxaan hubineynaa in aan marna la ururin xog aan waxtar laheyn, si aad loo ilaaliyo nolosha gaarka ah ee isticmaale kasta.



Annaga waxaan macluumaadkiina ku kaydinaynaa kuna falgaleenaa Switzerland. Kuwa wadashaqeynta naga dhexeyso, waxay ixtiraamaan xeerarka Swiss iyo Yurub dhinaca dhowrida macluumaadka.



Klapp waxa uu suurtagelinayaa is-ku-tashiga wixii warar ah. Isticmaale kastaa asigaa go'aansanaayo macluumaadka uu rajeynaayo inuu la wadaago isticmaalayaasha kale.



Ma jiro wax duubis ah oo ku saabsan hab-dhaqanka wax barista isticmaalaha. Si loo ilaaliyo nolosha gaarka ah ee isticmaalaha, Klapp ma keydiyo habdhaqanka wax baarista isticmaalaha.

Xeerarka noo degsan ee Caddeynta Kalsoonimada (<https://fr.klapp.pro/datenschutz?lang=fr>), waanu ku wargelineynaa isticmaalayaashayna (macalimiinta, masuuliyiinta heyadda, ardayda, waalidiinta, xubnaha ururada, ...) macluumaad shakhsiyeedka ee aynu kaydino ee iyaga ku saabsan, qaaabka aan u isticmaalno macluumaadkaas iyo, markey noqoto, cida aan la wadaaagi karno. Waxaad sidoo kale ka heli doontaan warar ku saabsan xuquuqda leydin siiyay ee ku saabsan isticmaalka macluumaadkiina.

Haddii aad su'aalo ka qabtaan oo saabsan ilaalinta xogtamacluumaadkiina ama aad jeclaan laheydeen inaad codsataan in la tirtiro macluumaadkiina, faqlan la xiriira wakiilkeena ilaalinta macluumaadyada idinka oo u diraayo imeyl (e-mail) halkan info@klapp.pro.

Macluumaadka wakiiladeena dhinaca ilaalinta macluumaadyada waa:

Klapp Sàrl | Elias Shibli | Föhrenstrasse 1 | CH-5442 Fislisbach

Furaha oggolaanshaha Klapp

Dugsiga :.....
Ardayga :.....
Furaha oggolaanshaha:.....

Waa Muhiim: Fadlan dukumentigan meel ammaan ah dhig, maadaama koodka (furaha) sidoo kale loo isticmaali karo in lagu furi karo akoono dheeraad ah. Tani waa xaalad, tusaale ahaan, marka waalid kale uu jecelyahay inuu furto akoonka isla hal canug.

Gelidda ugu horeeysa kadib sameynta akoonkaaga Klapp

1. Ku gal cinwaankaaga i-maylka (e-mail) iyo eraygaaga sirta ah.
2. Buuxi xogtaada khaaska ah. Tallaabadan ugu dambeysa waxay buuxin doontaa diiwaangelintaada
3. Hadda waxaad heli kartaa wararka dugsiga, dukumeentiyada iyo dhacdooyinka oo idil dhanka Klapp. Waxaa lagugu wargelin doonaa shay cusub in lagugu ogaysiiyo qaab"baaq" ama iimayl ah.

⚠ XIRIIR DHEERAAD AH - Haddii aad heshay koodka oggolaanshaha kale, waxaad geli kartaa wakhti kasta adigo gelinaya "Classes" raacsii (+).

Fiiro gaar ah: Dhowr Aaladood (smartphone / tablet) ayaa lagu isticmaali karaa isla koontada Klapp.

Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah boggayaga www.klapp.pro Haddii aad wax su'aalo ah ka qabto barnaamijka Klapp, waxaad la xirii kartaa hawl-wadeenadeena: 032 510 08 38 | support@klapp.pro | Isniinta ilaa Jimcaha 8:00 subaxnimo ilaa 12:00 galabnimo | 1:00 duhurnimo ilaa 5:00 galabnimo-